



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA  
Xafiiska Madaxweynaha

جمهورية الصومال  
مكتب الرئاسة

Republic of Somalia  
Office of The Presidency

XEER MAAXWAYNAHA Lr. 118  
Oggolaanshaha Ansaxinta Heshiiska Soomaaliya  
Iyo Turkiga kuna saabsan Tabarada Ciidamada  
Iyo Protocol-ka Dhaqangelinta Dhaqaale

Taariikh: 07/08/2013

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Xarafka ' C ' iyo Qodobka 90aad, Faqradda 6aad ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Warqadda Wasiirka Koowaad Lr. XRW/00171/12/12 ee 17/12/2012 kuna saabsan  
u soo gudbinta Miisaaniyadda Golaha Shacabka.

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. 614-XG-08-13 ee 05/08/2013 kuna  
saabsan ansaxinta Heshiiska Tababarada Ciidamada iyo Protocol-ka Dhaqangelinta  
ee Iskaashiga Dhaqaale ee u dhexeeyo labada dal.

Isaga oo tixgelinaayo: Inay dan u tahay Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed.

Wuxuu soo saaray Xeerkaan


Qodobka 1aad


Laga bilaabo Maalinta uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya Saxiixo Xeerkaan, waxuu  
Madaxwaynaha oggoladay Ansaxinta Heshiisyada Dhexmaray Soomaaliya iyo Turkiga oo kala ah Heshiiska  
Tababarada Ciidamada iyo Protocol-ka Dhaqangelinta Iskaashiga Dhaqaale ee labada dal.

Qodobka 2aad.

Waxuu Xeerkaan dhaqangeliyaa maalinta uu Madaxwaynaha Saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta  
Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

MUQDISHO, 07/08/2013

  
Madaxweynaha J.S  
Mudane Xasan Shiikh Maxamuud





Ref: 614-XG-08-13:الرقم

Mogadishu, 5 August 2013 التاريخ

Ku: - Madaxweynaha Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya  
Muqdisho

Ku: - R/Wasaaraha Xukuumadda Fadaraalka Soomaaliya  
Muqdisho- (Tixraaca:XRW/161/12/2012 ee18.12.2012)

Og: - Garyaqaanka Guud ee Dawladda  
Muqdisho

Og: - Guddoomiyaha Guddiga Difaaca  
Muqdisho

Og: - Xoghaya Guud ee Golaha Shacabka - Muqdisho

**UJEEEDO: - ANSIXIN HESHIISKA IYO PROTOCOL-KA ISKAASHIGA IYO TABABBARADA  
CIIDAMADA DHEXMARAY SOOMAALIYA IYO TURKIGA**

Mudane Madaxweyne;

Waxaan kugu wargalinayaa inuu Golaha Shacabka Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Heshiiska iyo Protocol-ka Iskaashiga iyo tababbarada Ciidamada kaasoo dhexmaray Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Turkiya oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka fadhigiisii 10<sup>aad</sup> ee Kalfadhiga aan caadiga aheyn ee 1<sup>aad</sup> taariikhdu markay aheyd 20/07/2013 oo ka dhacay xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidan hoos ku xusan:-

- Xildhibaan ogolaadeen: 170 (Boqol iyo toddobaatan)
- Xildhibaan diidey: 14 (toban iyo affar)
- Xildhibaan ka aamustey: 3 (saddax)

**Fiiro Gaar ah:** Waxaan kula socodsiineynaa inay Guddiga Difaaca ee Golaha Shacabka ku soo dareen Qodobka 6<sup>aad</sup> ee Heshiiska farqada (6.8) oo u qoran "Waa in fursad kale la siiyaa

*xubnaha ama saraakiisha tababarka loo diray ee aan ku guuleysan imtixaankii qalinjabinta, hadii aysan jirin sabab macquul ah oo loogu diiday”.*

Hadaba Mudane Madaxweyne waxaan si waafaqsan qodobka 90<sup>-aad</sup> xarafka (q) ee Dastuurka J.F.S kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda si waafaqsan Qod.84 iyo 85 ee Dastuurka,


Anigoo huba in waajibkaaga dasturiga ah aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shabka waxaad naga gudoontaan salaan diiran iyo gadaal in gaar ah.


  
**M. ne Muxammad Sh. Cusmaan “Jawaari”**  
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**




## ANSIXINTA

### Heshiiska iyo protocol-ka iskaashiga iyo tababaridda Militariga: Jumhuuriyadda Somaaliya iyo Jumhuuriyadda Turkiya

Guddoomiyaha Barlamaanka J.F.S	
Tirada Xubnaha Codeysay 187: Oggol 170-Diiday (14)- ka aamustay (3)	
 Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawari	Taariikh: 20/07/2013

Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad - Barlamaanka J.F.S	
	
Saxiixa: M. ne Jeylaani Nur Iikar	Taariikh: 20/07/2013

Guddoomiye Ku Xigeenka 2-aad - Barlamaanka J.F.S	
	
Saxiixa: M. ne Mahad Cabdalla Cawad	Taariikh: --20/07/2013



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
GOLAHA SHACABKA



# Heshiiskii Tababarada Ciidamada Dhexmaray Soomaaliya iyo Turkiga

---

Taariikhda la-Ansixiyay

20 Luulyo 2013

## Heshiiska dhexmaray Xukuumadda Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Xukuumadda Jamhuuriyadda Turkiga ee ku saabsan Iskaashiga Tababarka Militari

Xukuumadda jamhuuriyadda Soomaaliya iyo xukuumadda Jamhuuriyadda Turkiga (ka dib, si kali ahaan ku sifoobaya ama loogu yeerayo kali ahaan "dhinaca", wadar ahaana loogu yeerayo "dhinacyada").

Iyadoo laga ambaqaadayo, "Heshiiskan dhexmaray Xukuumadda Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Xukuumadda Jamhuuriyadda Turkiga ee ku saabsan Tababarka Militari, farsamo iyo iskaashiga culunta u gaarka ah dhinaca militariga (Qaabdhismeed/frameworke)" la saxiixay 22kii bisha may 2012, Ankara.

Iyadoo hoosta laga xariiqayo, xiriirka saaxibtinimo ee u dhexeeya labada dhinac iyo rabitaankooda ah, inay sii kobciyaan iskaashigooda.

Waxay ku heshiiyeen, waa sidan soo socota:-

### . Qodobka 1 aad

Ujeedka

Purpose

Ujeeddada heshiiskan, waa dhisida hanaan iskaashi oo ku saabsan dhinaca tababarka milatari.

### . Qodobka 2 aad

Baaxada dhaqan galinta

Scope of Implementation

2.1. Sida ku qeexan Qod. 4aad, shuruudaha ka hoos dhalanayaa heshiiskan waxay ku fulayaan saraakiisha ciidan la tababarayo, (NCOs), kuwa darajada hoose iyo kuwa rayidka ee xubno ka ah ciidanka qalabka, ee dhinac ahaan ka qeyb qaadanaya howlaha iskaashiga iyo kuwa dhinaca kala aqoon kororsiga ka qaadanaya hay'adaha tababarka Militari, waaxyaha adeega ciidanka iyo shaqaalaha heer unuga, hay'adaha iyo xarumaha adeega iskaashi iyo kan tababarku ku fulayo ama ku qabsoomayo.

2.2. Shuruudahani, waa inay, marka loo baahdo, lagu fuliyo dadka la xiriira ana dulsaar ku ah qeybaha kor ku xusan iyo shaqaalaha ugu dhaw ama ku sifoobaya (applicable).

### . Qodobka 2 aad

Eray Qeexid / Definitions

Erayada ku qaabeysan heshiiskan,

- a) "Heshiis/agreement" waxa loola jeedaa, Heshiiska dhexmaray Xukuumadda Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Xukuumadda Jamhuuriyadda Turkiga ee ku saabsan Iskaashiga Tababarka Militari.
- b) "Dowladda Direysa/Sending State" waxa loola jeedaa, Dowladda direysa xubnaha ama shaqaalaha, agabka ama qalabka ee ku socda dowladda kale si loo dhaqan galiyo heshiiskan.
- c) "Dowladda loo dirayo/Receiving State" waxa loola jeedaa, Dowladda qabaneysa xubnaha/shaqaalaha, agabka ama qalabka ku socda dowladda loo diray carigeed/dhulkeeda.
- d) "Hay'ada u dhiganta/Competent Authority" waxaa loola jeedaa, Kartida hay'addaha labada dhinac, ugu qeybsan hirgalinta heshiiskan,
  - 1) Dhinaca Soomaaliya waxa u xilsaaran: Wasaaradda Difaaca Jamhuuriyadda Soomaaliya.
  - 2) Dhinaca Turkiga waxa u xilsaaran: Janaraal Sarey-gaas, Jamhuuriyadda Turkiga.
- e) "Xubnaha martida ah/Guest Personnel" waxaa loola jeedaa, xubno ciidan ama rayid ah ee ku sugan cariga labada dhinaca, una jooga in la tababaro, macalimiin/tababaryaal, la taliyayaal, goobjogayaal hirgalinaya heshiiskan.
- f) "Dadka la xiriira/Dulsaar/Dependents" waxaa loola jeedaa, dadka la socda, xaasaska iyo caruurta ku xiriira xubnahaas ee ku qodobaysan xeerarkooda.
- g) "Taliye/Commander" waxaa loola jeedaa, hogaamiyaha ka talinaya xarunta weyn ee ciidanka, saldhig ama ciidanka u xilsaaran howlaha iyo xubnaha ciidan ee la dirayo.
- h) "Saraakaal ciidan oo sare/senior military personnel" waxaa loola jeedaa, saraakiisha ama xubnaha darajooyinka sare ee ciidanka kuna magacaaban hab waafaqsan shuruucda qaran ee dalka ciidanka diraya, xubnaha kormeeraya howlaha militari iyo kooxaha loo dirayo tababarka.

#### Qod. 4aad

#### Dhinacyada la iska kaashanayo

#### Field of cooperation

Dhinacyadu waa inay iska kaashadaan arrimaha tababarka ciidanka ee soo socda, dhinacyada kale ee gaarka ama la xiriirka la leh tababarka iyo waxbarida ay labada dhinac ku heshiiyaan:

- a) Tababarada lagu bixinayo kuliyadaha dagaalka, akaadimiyada caafimaadka ciidanka, tasmada hogaanka guud.
- b) Tababarka dugsiyada ka farcama ciidanka (dugsiga sare ee militariga, akaadamiyada militariga, dugsiga caafimaad ee militariga, dugsida sare ee xarumaha farsamda ciidanka iyo laamahaas dugsi.
- c) Tababarida iyo waxbarida ciidanka qalabka sida iyo kan ilaalada xeebaha.
- d) Xarumaha Tababarka waxay siinayaan xirfado hordhac ah iyo carbis kala duwan oo la xiriira tababarka.

Waa tarjamaad guud oo si degdeg lagu diyaariyey

- e) Howlgalka shaqo iyadoo lagu-guda jiro ayaa laamaha, xarumaha iyo hay'adaha wax lagu dhex barayaa.
- f) Iskaashi iyo booqasho dhex marta laamaha dhexdooda, xarumaha iyo hay'adaha.
- g) Booqashada furdooyinka iyo marsooyinka la xiriira.
- h) Is-weydaarsiga wufuudda.
- i) Ku martigalin goobjoog ahaan, dhoolatusyada ciidan.
- j) Ka qeybgalka si wadajir ah dhoolatuska ciidan.
- k) Xog isdhaafsiga si loo horumariyo tababarka.
- l) Si siman in xogta, taariikhda, horumarka iyo aqoonta ciidan la isweydaarsado.
- m) Tababarka la xiriira cafimaadka ciidanka.
- n) Iskaashiga kuu aadan tababarka saadka.
- o) Taakuleynta nabada, gurmada iyo adeegan bani-aadamka, ka hortaga budhacad badeedka.
- p) Siinta casharo gaar ah (weerarada bada gunteeda ah, ciidanka biyaha hoose NCO1 ninmaanyo/seaman iwm).
- q) Isweydaarinta ama Isu ergeynta shaqaalaha
- r) Barista shaqaalaha luqadaha iyo casharada la xiriira.

#### Qod. 5aad

#### Tilmaamaha iskaashiga guidelines of cooperation

5.1 Tababarka iyo waxbarida waxaa loo gudbiyaa hab waafaqsan hanaanka iyo marinka u asteysan dowladda loo dirayo (tababarka fidineysa).

5.2. Sida heshiiskani qorayo, codsi tababar ciidan kasta, oo ka yimaada, dowlada direysa waa inay ku wargaliso dowladda loo dirayo, ilaa bisha maarso ama ugu danbeyn hal sano ka hore, tababarka ama uu bilaabmiy casharku. Markuu codsigu soo gaaro, dowladda loo dirayo waa inay hubisaa codsiga inta kaga aadan awood ahaan, waa inay, wargalisaa dowladda soo dirtay jawaabta.

5.3. Xaaladaha gaarka ah, dhinacyadu waa inay wargalinta iyo codsigooda tababarka mudada gaaban iyo qaababka kale ee tababar ee heshiiska hoos yimaada marinkeedu waa wargalin qoraal ah.

5.4. Dowladda loo dirayo waa inay talaabooyinka ku haboon qaadaa, dowladda direysan waa inay wargaliso dowladda qaabileysa, go'aanka iyo ka qeybgalayasha oo sugan, tirada ka qeybgaleysa, faahfaahinta safarka iyo xogta kale ee la xiriirta ugu yaraan 45 (shan iyo afartan) cisho ka hore intaanu tababarku bilaabmin.

5.5. Iskaashi baa la abuurayaa ku aadan qadarinta qaabdhismeedka sharci iyo arrimaha mudnaanta u leh labada dhinac ama faa'iido ugu jirto.

#### Qod. 6aad

#### Hanaanka/Shuruudaha Tababarka

#### Terms of Training

6.1. Tababarka xubnaha martida ah waa inuu ku sugan yahay barnaamijka laamaha iyo hay'adaha ciidanka ee tababarka loo fidinayo. Haddii casharadu saameynayaan arrimo dhowr ah oo la xiriira amaanka qaranka, waa la soo koobayaa ama la yarayn karaa.

6.2. Dowladda qaabileysa ciidanka waxay ogeysiineysaa agabka iyo qalabka loo fidinayo xubnaha ciidanka ah ee qaadanaya tababarka iyo waxyaabaha dib loogu celinayo dowladda qaabileysa.

6.3. Xubnaha iyo saraakiisha ciidanka ee ujeeddada loo dirayo ay tahay tababarka ciidaan, waa inay u magacaaban yihiin (defined criteria) hanaan waafaqsan qaab dowladda loo dirayo ciidanka. Xubnihii buuxin waaya qaabkaas/arrimahaas la ogolaan maayo tababar iyo waxbarasho.

6.4. Hababka qiimeynta ama imtixaamida aqoonta iyo ciqaabta waa sida u dajisan dalka qaabilaya.

6.5. Borotokoolada, haddii labadda dhinac u arkaan in loo baahan yahay, tababarka waa lagu dhameyn karaa sadexbilood wax ka badan ama/iyo khatar lagama maarmaan ahi jirto. Borotokooladaas way ka mid noqon karaan arrimahan soo socda ama wixii kale ee loo tixgaliyo inay muhiin yihiin.

- a) Ujeeddada tababarka
- b) Goobta tababarka
- c) Shuruudaha iyo xaalada tababarka
- d) Xuquuqda iyo wajjibaadka mudada tababarka
- e) Taariikhda bilowga iyo dhamaadka tababarka, tirada ka soo qeyb gashay.
- f) Heerka aqooneed ee ka soo qeyb galayaasha.
- g) Sugida amaanka xubnaha ciidan ee tababarka ku jira.
- h) Hababka caymis ee xubnaha ciidaanka.
- i) Habka mag-dhabista waxyeelada iyo khasaaraha (*Method of Compensation*)
- j) Kharash dib ugu celin daryeelka caafimaad (Reimbursement), daaweynta, daaweynta ilkaha waxa ka reeban markay xaalad deg deg ahi jirto, gurmada caafimaad (first aid and dental care),
- k) Xeerka ku saabsan hoyga iyo gaadiidka.
- l) Xeerka kale ee la xiriira oo qoran.

6.6. Dowladda qaabileysa waa inay qaado talaabooyinka ku haboon xubnaha ama saraakiisha iyo dadka ku xiran/dulsaarka ku ah (dadka la socda xaas ama caruur), loo fidiyaa hoy deegaan iyo nabad iyo ka faadiideysiga adeegyada kale.

6.7. Xubnaha ama saraakiisha tababarka loo diray ee ka qeyb galay tababarka, xubnihii dhameystay mudadii iyo barnaamijka tababarka, inta ku guuleystay imtixaankii loogu talagalay ama ku guuleystay qoraalkii qalin jabinta, waxaa la siinayaa shahaado ay ku qeexan tahay dhameystirka tababarkaas (appropriate academic degree).

#### Qod. 7aad

##### Ilaalinta/Sugidda Xogta Qarsoon

##### Protection of the classified information

7.1. Dhinacyada heshiiskan waxaa waajib ku ah inay fidiyaan, ilaaliyaan sugaan dhammaan xogaha qoran, agab ah, qalab ah iyo wixii xog ah ee labada dhinac isku weydaarsadaan si wada jir ah howlaha dhaqan galinta heshiiskan si waafaqsan shuruucda dalka iyo xeerarka kale. Dhinacyadu qaab ahaan waa inay talaabooyin isku mid ah qaadan, ilaalinta xogta ka dhaxeysa ee si siman ugu qarsoon. Xogta qarsoon ee la daahay "Waa qarsoodi, waa sir, waa wax qarsoon, waa xog aan la shaacin".

7.2. Dhinacna ma iibin karo, wareejin karo, qoraalada farsamo ama xogta kalle ama qoraalada hubka, agabka iyo qalabka ama wixii la soosaaray, la isu fidiyey mudadii la hirgalinayey hawlaha iyo dhinacyada ku dhex qaabeysan heshiiskan, dhinac sadexaad ama cid kale lalama wadaagi karo ummad sadexaad ama dhinac kale iyadoon si hordhac ah ogolaansho qoraal ah laga helin dhinica labaad.

7.3. Sugnaanta xogta la isweydaarsaday isma badeleyso.

7.4. Dhinacna ma isticmaali karo xogta uu helay mudada hirgalinta shuruudaha heshiiskan hanaan wax ugu dhimaya danaha dhinaca kale.

7.5. Dhinacyadu waxay wali masuul ka yihiin xanibaada xogaha lagu daahayo iyo adkeynteeda xitaa marka uu buro ama jabo heshiiskan.

7.6. Si kasta oo lama filaan u ah, xogaha la is weydaarsaday baaxada ama muga heshiiskan ku hirgalayo, dhinicii ay u suurta gasho wixii la halmaala, waa inuu markiiba ku wargaliyaa dhinaca kale arrimaha la halmaala.

#### Qod. 8aad

##### U dhignaansha heshiisyada kale ee caalamiga ah Compatibility with other international agreements

Qodabada heshiiskan waa in aysan waxyeeleeyn waajibaadka ka saaran dhinacyada heshiisyada caalamiga ah ee labada dhinac ku jiraan.

Qod. 9aad  
Arrimaha Gaarka ah  
Special matters

9.1. Xubnaha martida ah iyo dadka ku xariira xil kama fuulayo, dhinac kale iyo loolan dagaal oo ka jira ummad kale oo sadexaad iyo ka qeybgalka howlo waxyeelo u keeni kara danaha iyo amniga dowladda qaabilaysa ciidanka mudada tababarka iyo joogitaankooda cariga dowladda qaabilaysa ciidanka. Xubnaha martida ah iyo dadka ku xariira waa inaanay ka qeyb qaadan howlo kale oo ka baxsan kuwa ugu qoran heshiiskan cariga dowladda loo diray gudaheeda.

9.2. Go'aanada hay'adda ee ku aadan xaalada xubnaha ama saraakiisha martida ah een ka qeybgali karin tababarka/waxbarida sababo la xiriira awooda dhimirka ama anshax la'aan, asluub la'aan (dishbili la'aan/indisciplinary) iyo arrimo caafimaad darro ah, waxaa iska leh gu'aankaas, dugsiga militari, saraakiisha acaadimiyada iyo horjoogayaalka xarumaha adeega ciidanka, ka burinta iyo ka joojinta sii wadashada tababarka iyo waxbarashada, wuxuu meelmarayaa ka dib markuu aqbalo tallo soo jeedinta hogaanka sare/sareyogaas.

9.3. Dowladda direysa waxay xaq u leedahay dib uga noqoshada baahida xubnahaas iyo dadka ku xiriira dowladda loo dirayo, goor kasta iyadoon sababeynin ujeedada haddii ay u aragto lagama maarmaan. Dowladda qaabileysa waxay fududeynaysaa dib ugu soo celinta xubnahaas dalkooda hooyo sida ugu degdeg badan.

9.4. Marka xaaladaha dagaal, loolan dagaal, kacdoon bulsho, xasaradaha caalamiga ah, dowladda qaabilaysaa waxay ka codsan kartaa dowladda direysa u yeeris xubnah/saraakiisha. Dowladda direysa waa inay markiiba codsigaas meelmarayaa.

Qod. 10aad  
Arrimaha sharciga  
Legal matters

10.1. Xubnaha martida ah iyo dadka ku xariira, waxaa ku fulaya ayna u hogaansamayaan shuruucda jirta, xeerarka iyo garsoorka dowladda loo diray ee Carrigeeda ay joogaan, galitaanka iyo bixitaanka carrigaas, wixii faldanbiyeed ah ee ka dhaca cariga dowladda loo diray shuruucdeeda ayaa lagu dhaqmayaa. Haddii shuruucda garsoor ee ka jira dowladda loo diray carigeeda lagu dhaqmayo, xukunka la qaadayo nuxurkiisa ama wixii ganaaxa ah ee aan ku jirin xeerarka dowladda direysa, ganaax lagu mideysan yahay oo ku haboon kuna aadan xeerarka labada dowladood ayaa ku fulaya ama lagu qaadayaa.

10.2. Haddii xubnaha martida ah iyo dadka ku xiriira la qabto, dowladda loo diray waa inay ku wargalisaa dowladda soo dirtay arrinta qabashadaas ama xarigaas.

10.3. Haddii dowladda loo diray ay bilowdo baaris mid ka mid ah xubnaha martida ah iyo dadka ku xariira, isaga/iyada waxaay muteysanayaa xuquuqda ay u leeyihiin difaac iyo badbaado sharci ama qareen oo aan ka yareen hal ama mid oo u dhigma inta dowladda loo diray shacabkeeda u fidiso.

10.4. Haddii xubnaha martida ah ay ku xadgudbaan shuruucda dowladda loo diray, howsha ay u joogaan way ku burayaan/waa lagu burin karaa.

10.5. Dowladda direysa way ku anshax marineysa ama ku qaadaysaa asluub marin xubnaha martida ku ah cariga dowladda loo diray. Balse, hay'adaha iyo hogaanka ciidan ee dowladda loo diray, waxay siin kartaa wargalin hay'adaha la xiriirta ee xubnaha martida ah ay hoos tagayaan.

10.6. Saraakiisha iyo hogaanka sare ee dowladda diraysa waxay u igmatay hay'adda ciidan inay ku fuliso ama ka qaado talaabo anshax iyo mid asluub marin oo ku haboon falalka ka yimaada xubnahooda, si waafaqsan shuruucda adeega militari & shuruucda anshaxmarineed.

Qodabka 11aad  
Arrimaha Maaliyadda  
Financial matters

11.1. Dowladda loo dirayo waa inay go'aan ka gaartaa haddii tababarka loo fidinayo ay kharash ku bixiso, kharash la'aan ama qiimo dhimis lana wareegtaa qiimahan arrimaha soosocda haddii tababarka la siinayo yahay mid kharash la'aan ah.

a) Xubnaha ciidamadda ee la tababaryo;

- 1) Xero
- 2) Hooy
- 3) Gunno maalmeed (*shuruudaha iyo qiimaheeda waxaa jaangoynaya dowladda loo dirayo*).
- 4) Qiimaha tababarka/waxbarida
- 5) direys ciidan (*ku saleysan gunooyinkooda oo u dhigma darajada ciidan dowladda loo diray*)

b) Tababarka Saraakiisha ciidan NCOs;

- 1) Mishaar bileed (*shuruudaha iyo qiimaheeda mishaarka waxaa jaangoynaya dowladda loo dirayo, waafaqsana heerka drajo saraakiisha la tababarayo & NCO*)
- 2) Qiimaha tababarka/waxbarida
- 3) Direys ciidan (*direys uu xiran karo oo kaliya sarkaalka la tababarayo, saacadaha tababarka casharku socdo iyo gunno u dhiganta tababarka saraakiisha dhinaca loo diray*)

11.2. Markay go'aamiso Dowladda loo diray bixinta tababarka kharash xanbaarsan, kharashaadka ku xusan Faqrada laad ee qodobkan, waxaa bixinaya dowlada direysa taasoo ugu wareejineysa doolar ahaana xisaab banki ee u furan Dowladda loo dirayo, sodon maalmood (30) gudahood ee howlaha tababrku ku soo dhammaado.

11.3. Xubnaha martida ah iyo dadka ku xariira waxay u hogaansamayaan bixinta cashuuraha laamah kastamka dowladda loo diray iyo xeerarkeeda ganacsi mudada ay ku sugan yihiin, lagab bilaabo galitaanka iyo ka bixidda cariga dowladda loo diray.

11.4. Xubnaha military iyo dadka ku xiriira (Lab ama Dhadig ahaan) ee muteysta/muteysata deyn, marka ay dhammaato kana socdaalayaan cariga dowladda loo diray sabab kastooy noqoto, Dowladda dirtay waa inay qaadaa talaabooyinka ku haboon ee ku aadan deynka aanu bixin xubnaha martida ah.

#### Qodabka 12aad

##### Waxyeel/Khasaaro iyo dhowris/badbaadin

##### Damage/Loss & Indemnities

12.1. Xeer hosaadka Dowladda loo diray ayaa la dhaqangalinyaa marka la xalinayo dhowrid la'aan ama cabasho dhinac sadexaad oo khasaaro ama waxyeelo soo gaartay (hadduu caalami yahay ama ku yimaado beylahid xad dhaaf ah) oo ku yimaada hanti ama agab, dad iyo deegaan. Labada dhinac waa inay si wadajir ah u go'aamiyaan haddii waxyeelada ama khasaarahu ku yimid, baylihid xad-dhaaf ah ama dhaqan xumo ula bareer ah.

12.3. Labada dhinac magdhow iskama weydiisayaan khasaare ama waxyeelo gaara deegaanka iyo agabka, waxaa ka reeban waxyeel ula bareer ah ama baylahid xad-dhaaf ah.

#### Qodabka 13aad

##### Arrimaha Maamulka

##### Administrative matters

13.1. Xaaladda xubnuhu ku sifoobayaan:

- a) Xubnaha martida ah iyo dadka ku xiriira ma yeelanayaan sifo diblomaasi, mudnaan ama dhowrsanaan (privileges and immunity)
- b) Waxaa ka reeban wixii labada dhinac ku heshiiyaan, Dowladda loo diray waa inaanay siin xubnaha martida ah wax ka duwan waxa ku xusan heshiiskan, heshiis ama xeerkalaa dib loo kala saxiixi.
- c) Xubnaha martida ah iyo dadka la xiriira ee la siiyey degenaanshaha cariga dowladda loo diray, kama qeby galikaraan dhaqdhaqaaq siyaasadeed.

### 13.2. Direyska

- a) Xubnaha ciidan ee la tababarayo, kuwa loo diro tababarka dugsiga sare ee militariga, akaadamiyda dagaalka iyo saraakiisha loo qondeynin, dugsiga sare ee farsamada, waa inay xirtaan (uniform) direys shaqo oo dowladda loo diray siinayso. Xubnahaas la tababarayo waxay suranayaan direyska astaan/calaamad military oo dowladda direysa siin doonto, si looga aqoonsado.
- b) Xubnaha kale waa iney xirtaan direyska (uniform) ciidankooda qalabka sida (direyska ciidanka qalabka sidan), cutubyada iyo hay'adaha dowladda loo dirayo. Waa inay xirtaan direyska rayidka ah goobaha ka baxsan cutubyada iyo hay'adaha ciidan.
- c) Dowladda loo diray waa inay siisaa xubnaha ciidanka ah tababar la mid ah iyo direyska shaqo ee ciidanka qalabka sida ku shaqeyaan ama xirtaan.

### 13.3. Fasaxa:

- a) Nasashada, fasaxyada iyo maqnaanshaha xubnaha martida ah waxaa nidaaminaya xeerarka tababar iyo heerarka darajo ee ka jira ama u dhigma Dowladda loo diray.
- b) Xubnaha martida ah si isdaba joog ah way ka maqnaan karaa muddo tababarka ay go'aamiyaan hay'adaha tababarka ee la xiriira, ka dib marka ogolaansho, warbixin iyo fasax caafimaad laga helo, mid ka mid ah xarumaha caafimaad ee military Dowladda loo diray. Haddii ay dhacdo in qofkaasi u horay uga bogsan jirada haysa si u dib ugu bilaabo howlaha tababar dhammaadka fasaxa caafimaad, hawlahiisa/howlaheeda go'aan baa laga gaarayaa, qof kale ayaa lagu badali karaa kadib markay ogolaato Dowladda loo dirayo.
- c) Fasaxyada marka laga reebo kuwa ka baxsan cariga ummadda loo dirayo, waxaa bixinaya hay'adaha u xilsaaran ummadda loo dirayo si waafaqsan heshiiskan iyo hay'adaha labada dhinac ugu xilsaaran.
- d) Xubnaha martida ah wuxuu u hogaansamayaa saacadaha shaqo iyo shuruudaha ama xeerarka al xariira ee looga dhaqmo dowladda loo diray.
- e) Dhammaan kharaskha gaadiid ee ka baxsan cariga dowladda loo diray, waxaa bixineysa dowladda direysa, waxay u fidineysa dowladda loo diray gaadiid la xiriira howlaha tababrka.

### 13.4. Geeri:

- a) Haddii ay geeri ku timaado xubnaha martida ah ama dadka ku xariira, dowladda loo diray waxay markiiba ku wargalineysaa xaalada dowladdi dirtay.
- b) Codsiga dowladda dirtay ka dib, dowladda loo diray waxaa xil ka saaran yahay inay taageero kasta u fidiso daadgureynta qofkaas geeriyooday, loo gaarsiin lahaa gagida

Waa tarjamaad guud oo si degdeg lagu diyaariyey

diyaaradeed iyo mid badeed ee ugu dhow ee ka jiraa xuduudaha cariga dowladda loo diray iyo bixinta kharashaadka la xiriira.

Qodabka 14aad  
Adeega Caafimaadka  
Health Services

14.1. Xubnaha military iyo dadka ku xiriira waxay ka faa'iidaynaan gurmada caafimaad, daaweynta iyo xarumaha daryeelka ilkaha ee ka jira xarumaha caafimaad ee militariga dowladda loo diray shuruudaha u yaal xubnaha dowladda loo diray. Kharashaadka adeega caafimaad ee dheer, baarista, bukaan socodka, bukaanjiif, daaweyn iyo adeeg caafimaad oo kale sida kharashka caafimaad safarid iyo ku soo colin dalkooda, waxaa u xilsaaran dowladda direysa.

14.2. Adeegyadan soo socda way ka reeban yihiin baaxada la wadaago, baarista caafimaad iyo taakuleynta daryeelka ilkaha:

- a) Daaweynta bukaan socodka iyo ilka daaweyn laga raadsaday dhakhtar rayid ah.
- b) Gaadiidka ambilaanska bukaanka ee aan ahayn kan military.
- c) daaweynta cuduradda iyo xanuunada gabowga, dib u sameynta waaxyaha jirka iyo daaweynta hababka gaarka ah ama farsamooyinka gaarka. (anti-aging cures, osteoporosis treatment, auxiliary reproduction techniques and special treatment methods)
- d) Agabka araga iyo maqalka.
- e) Waaxyaha jirka ee sameyska ah.
- f) Adeega iyo waxqabaka shaybaarada ilkaha.
- g) Kibista jabka iyo agabyada jirka ama jabka lagu xiro.
- h) Adeega arrimaha hooyada/haweenka.

14.3 Dhammaan kharashaadka adeega xarumaha caafimaad ee rayidka iyo hay'adaha la xiriira waxaa bixinaya ama masuul ka qofka isticmaala.

14.4 Kharashaadka adeega daaweynta caafimaadka iyo wixii kale ee caafimaad ah, marka laga reebo baarista caafimaad iyo daryeelka ilkaha ee xubnaha military iyo dadka la xiriira, dowladda dirtay waa in ay warbixintooda heshaa, dhammaadka tababar kasta iyo mudada casharka sadexdii bilood hal mar, taaso ku xiran habka ay

mudnaanta u siiso, hay'ada ugu xilsaaran dowladda loo diray ciidanka. Hay'ada u xilsaaran dowladda direysa kharashaadka waxay ku shubeysaa xisaabta banki ee u furan hay'ada kale ee arrmaha ciidan ugu xilsaaran dowladda loo diray, kharashkaas oo dolar ah mudo bil gudaheed ah taariikhda wargalinta gaarto, ku celinta jawaab iyo wargalin hay'ada u xilsaaran dowladda loo diray.

Qodabka 15aad  
Adeega Bulshada  
Social Services

15.1. Xubnaha military iyo dadka ku xiriira waxay ka faa'iideysanayaan xarumaha iyo goobaha ganacsiga, dukaanada iyo xarumaha bulsho ee ciidanka u furan iyo ilaalinta shuruucda ugu dajisan arrimhaas dowladda loo diray ciidanka.

- a) Waxay ka faa'iideysanayaan maalin walba xarumaha bulshada (marka laga reebo kaamamka jimicsiga), xarumaha ciidan ee xubno u adeega dowladda loo diray ciidanka, marka ay ogolaansho bixiso.
- b) Waxay ka faa'iideysanayaan xarumaha adeega bulshada ee kale, (marka laga reebo kaamamka jimicsiga) maalin walba ama ujeeddo deegaan leh iyadoo laga fasax qaadanayo dowladda loo diray hab waafaqsan shuruucda u taal iyo qiimaha u go'an.
- c) Xubnaha military ee martida ah waxay sidoo kale ka faa'iideysanayaan xarumaha kale ee madadaalada/caweyska, xarumaha cubutyada ciidan, taliska iyo hay'adaha kale ee xubnaha lagu tababarayo ka dib markuu ogolaado taliyaha qeybta.

Qodabka 16aad  
Kastamka & Arrimaha Baasaboorka  
Customs & Passport matters

16.1. Xubnaha military iyo dadka ku xiriira waa inay u hogaansamaan shuruucda u taal dowladda loo dirayo, safarka dadka ajnabiga ah ee galaya carigaas, waa inay raacaan habdhowrka socdaalka u yaal kastamka/furdooyinka, galid iyo ka bixid cariga dowladda loo diray ciidanka.

Qodabka 17aad  
Dhigaal iyo Saxiixa

**QODOBKA 17aad**  
**XALINTA KHILAFAADKA**

17.1 Wixii dhibaato, iskahorimaad tarjumaad ah amba muran ah ee laga yaabo inay ka dhashaan taabagelinta amba tarjumida Heshiiskani ah waxaa lagu xalinayaa wadatashi iyo wada xaajood dhex mara Dhinacyadda, xalinteedana looma gudbin doono maxkamad qaran, mid caalami ah amba dhinac sadexaad. *Inta ay siocoto xalinta muranada Dhinacyaddu waxay sii wadi doonaan fulinta waajibaadkooda*

17.2 Marka loo gudbiyo Dhinacyada, muranka xalintooda waxaa ka hawl geli doona Dhinacyadda, wada xaajoodkuna wuxuu bilaabmi doonaa 30(sodon) cisho gudahood. Haddii muranka wax natiiyo ah laga gaari waayo mudo 60( lixdan cisho gudahood dhinac kastaa wuxuu burin karaa Heshiiskani iyadoo la bixinayo ogeysiis qoraal ah oo 90(sagashan) beri ah.

**QODOBKA 18aad**  
**WAX KA BEDELID IYO DIB- U- EEGID**

Dhinac kastaa wuxuu qoraal ahaan ku soo jeedin karaa wax ka bedelid amba dib u eegis la xiriira Heshiiskani, hadii sidaasi la doono. Wadaxaajoodku wuxuu bilaabmi doonaa 30(sodon) cisho gudahood marka la helo ogeysiiskaasi qoraalka ah. Haddii wax natiiyo ah lagu gaari waayo 60 (lixdan) beri gudahood Dhinac kastaa wuxuu burin karaa Heshiiskani isagoo bixinaya ogeysiin 90(sagashan) beri ah. Wixii wax ka bedelid ah ee la isku raaco waxay ku dhaqan gelayaan si waafaqsan qodobada ku xusan Qodobka 19aad ee nidaaminaya taaba galka Heshiiskani

**QODOBKA 19aad**  
**SUGGIDA IYO TAABAGELINTA**

Heshiiskani wuxuu sharciyan taaba gelayaa taariikhda helitaanka ogeysiiska kama dambaysta ah oo la isu mariyo marinadda diblomaasiyadda oo ay Dhinacyaddu isku ogeysiinayaan dhamaystirka dhamaan talaabooyinka sharciyada gudaha ah ee loogu baahan yahay bilaabista taaba gelinta Heshiiskani

**QODOBKA LABAATANAAD**  
**MUDADA IYO JOOJINTA**

20.1. Mudada Heshiiskani soconayo waa 5 sano laga bilaabo taariikhda uu taaba galo. Haddii aan hal Dhinac aanu qoraal ahaan ku codsan burinta Heshiiskani 90(sagashan) beri ka hor dhamaadkiisa, mudada Heshiiskani wuxuu iskiis isku kordhinayaa (automatically)1 (hal) sano markiiba

20.2. Haddii hal dhinac uu go'aansado in Dhinaca kale ku dhaqmeyn amba ku dhaqmi karin qodobada Heshiiskani , wuxuu qoraal ahaan ku soo jeedin karaa in wada xaajood la qabto. Wadaxaajoodku wuxuu bilaabmayaa ugu dambayn 30(sodon)beri marka la helo ogeysiiska qoraalka ah. Haddii natiiyo la gaari waayo 60 (lixdan) beri gudahood, Dhinac kasta wuxuu burin karaa Heshiiskani isagoo bixinaya ogeysiis qoraal ah oo 90(sagashan) beri ah.

20.3. Haddii aanay Dhinacyaddu si kale ku heshiin, burinta Heshiiskani ma saamayn doonto barnaamijyadda iyo hawlaha socda

## Qoraalka iyo Saxiixa

Bandhiga Heshiiskani wuxuu ahaa 13 April, 2012, Ankara/Turkiga, waa laba nuqul oo ku diyaarsan Ingiriis iyo Turki, dhigaal walbana uu kan kale waafaqsanyahay ama la mid yahay,

Iyadoo goob joog laga yahay, waxaa labada dhinac u kala saxiixey, wakiilo rasmi ah oo labada Xukuumadood u kala igmadeen, ayaa saxiixay heshiiskan.

Dhinaca Xukuumadda  
Jamhuuriyadda Soomaaliya

Dhinaca Xukuumadda  
Jamhuuriyadda Turkiga

Saxiixa:

Saxiixa:

Magaca: Nur Shekh HAMUD  
Darajada: Xoghayaha  
Sii hayaha Safaaradda Soomaaliya.

Magaca: Salih SEVIL  
Darajada: Sareygaas

**AGREEMENT**

**BETWEEN**


**THE GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF SOMALIA**

**AND**

**THE GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF TURKEY**

**ON**

**MILITARY TRAINING COOPERATION**

A handwritten signature in black ink, appearing to be a stylized name, located at the bottom left of the page.A handwritten signature in black ink, appearing to be a stylized name, located at the bottom right of the page.

**AGREEMENT BETWEEN THE GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF SOMALIA AND THE  
GOVERNMENT OF THE REPUBLIC OF TURKEY ON  
MILITARY TRAINING COOPERATION**

The Government of the Republic of Somalia and the Government of the Republic of Turkey (hereinafter individually referred to as the "Party" and jointly as the "Parties"),

Pursuant to the "Agreement between the Government of the Republic of Somalia and the Government of the Republic of Turkey on the Training, Technical and Scientific Cooperation in the Military Field (Framework)" signed on May 22, 2010, in Ankara,

Underlying the existing friendly relations between the parties and their desire to enhance cooperation,

Have agreed as follows:

**ARTICLE I**

**PURPOSE**

The purpose of this agreement is to establish cooperation mechanisms in military training field.

**ARTICLE II**

**SCOPE OF IMPLEMENTATION**

2.1. As specified Article 4, the provisions under this Agreement shall apply to the officers, NCOs, cadets and civilian personnel who are members of armed forces of one Party taking part in the cooperation activities and who are received by another Party to study in its military training institutions, units and military facilities and to the personnel at the unit, institution and facility where the cooperation activity will be conducted.

2.2. These provisions, shall, when required, also apply to the Dependents of the aforesaid personnel to the extent applicable.

**ARTICLE III**

**DEFINITIONS**

Within this Agreement,

a. "Agreement" means Agreement between the Government of the Republic of Somalia and the Government of the Republic of Turkey on Military Training Cooperation,

b. "Sending State" means the state sending personnel, materiel or equipment to the Receiving State for the implementation of this Agreement,

c. "Receiving State" means the state receiving the personnel, materiel or equipment of the Sending State to its territory,

d. "Competent Authority" means the competent authorities of the Parties, related with the implementation of the Agreement

(1) On behalf of Somalia : Ministry of Defence of the Republic of Somalia

(2) On behalf of Turkey : General Staff of the Republic of Turkey

e. "Guest Personnel" means military or civilian individuals the Parties have in the territory of the another as trainer, teacher, consultant, observer for the implementation of this agreement,

f. "Dependents" means the accompanying spouses and children of the quest personnel in line with their legislation,

g. "Commander" means the leader commanding military headquarters, base or troop and responsible for the activities of the sent military personnel,

h. "Senior Military Personnel" means the highest-ranking military personnel appointed

according to the national legislation of the Sending Nation, who observes the activities of the military group sent for training.

#### ARTICLE IV FIELDS OF COOPERATION

The Parties shall cooperate in the following military training areas and/or other special areas regarding training and education agreed upon by both Parties:

- a. Training provided at War Colleges, Military Medical Academy and Mapping, General Command,
- b. Training at schools affiliated to forces (Military High Schools, Military Academy, Military Health Schools, NCO Vocational Higher School and Branch Schools)
- c. Training and education between Gendarmerie and Coast Guard Organizations,
- d. Pre-occupational training and task-related courses in training centres
- e. On-the-job training at the units, headquarters and institutions,
- f. Cooperation and visits among units, headquarters and institutions,
- g. Visiting harbours and docking,
- h. Exchange of delegation,
- i. Invitation to the exercises as observer,
- j. Participation in the joint exercises,
- k. Exchange of information in order to improve training,
- l. Mutual exchange of information on military history, achieve, museology and publication
- m. Training in military health,
- n. Cooperation in logistic training,
- o. Peace supporting, humanitarian relief and counter piracy.
- p. Specialization courses (Underwater attack, underwater officer/NCO, 1. class seaman etc.),
- r. Exchange of personnel.
- s. Assignment of personnel for language courses.

#### ARTICLE V GUIDELINES OF COOPERATION


